



Hadii midkiin ka shakiyo salaadiisa, ee uu garan waayo saddex miyuu tukaday mise afar, hatuuro shakiga, oo ha ku dhiso-hakabilaabo- inta uu hubo, hana sujuudo labo sujuudood oo sahwi ah inta aanu salaama naqsan ka hor

Abii Saciid Al-khudri-Allaha ka raali ahaadee-wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay -naxariis iyo nabadi korkiisa ah ahaatee-wuxuu yiri: "Hadii midkiin ka shakiyo salaadiisa, ee uu garan waayo saddex miyuu tukaday mise afar, hatuuro shakiga, oo ha ku dhiso-hakabilaabo- inta uu hubo, hana sujuudo labo sujuudood oo sahwi ah inta aanu salaama naqsan ka hor, haduu shan tukaday salaadiisay buuxinayaan-sujuudu sahwigu- oo witrka ka bi'inaysaa, haduu afar buuxiyeyna shaydaankay dulaynaysaa."

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu cadeeyey in qofka tukanaya haduu ka shakiyo salaadiisa oo uu garan waayo inta uu tukaday ma saddex baa mise afar? ha tuuro tirada dheeriga ah ee inuu ka shakiyey oo yaanu qaadan, saddexda ayuu hubaa, ee hatukado rakcad afaraad, ka dibna ha sujuudo labo sujuudood inta aanu salaama naqsan. Hadii inta uu tukaday xaqiiqo ahaan afar tahay, rakcada lagu daray shan ayey ku noqon, labada sujuudoodna baddal bay ka ahaanayaan rakcada, sidaasayna tiradu ku buuxsamaysaa oo noqon mayso tiro is dheer, hadii rakcada dheeriga ah ee uu tukaday afar tahayna, wuxuu noqonayaa mid gutay wixii laga rabey oo aan siyaado iyo nuqsan lahayn. Labada sujuudood ee sahwiguna shaydaankay dulayn iyo jabin ku tahay, wuxuuna noqonayaa mid ku hungoobay oo ku guul daraystay ujeedadiisii, waayo salaadii ayuu shaki ka galiyey, oo inuu ka kharibo damcay, wayse dhamaystirantay salaada qofku markuu gutay amarka Ilaahay ee ahaa sujuudii ibliis Ilaahay ku caasiyey markuu diiday inuu Ilaahay ku adeeco sujuudii Adam.

النجاة الخيرية
ALNAJAT CHARITY

